



**MAAMULKA SSC-KHAATUMO
XAFIISKA MAALIYADDA**

**XEERKA
CASHUURAHA BERRIGA
XEER Lr. 2/2023**

**Laascaanood
Diseembar 2023**



GOLAHA FULINTA MAAMULKA SSC-KHAATUMO SOOMAALIYA
XAFIISKA HOGGAAMIYAHA

Summad: GF/XH/002/2024
Xeer Hoggaamiye Ln. 12

TR: 11/01/2024

ANSIXINTA SHARCIYADA KALA AH:-

1. *Sharciga Maamulka Guud ee Maaliyadda*
2. *Sharciga Cashuuraha Berriga iyo Tacriifaddiisa*
3. *Sharciga Cashuuraha Kastamada iyo Tacriifaddiisa*
4. *Miisaaniyadda Saddex biloodka ah*

HOGGAAMIYAHA MAAMULKA SSC-KHAATUMO

Markuu Arkay:

Qodobka 6aad ee Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo

Markuu Arkay:

Qodobka 14aad ee Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo

Markuu Arkay:

Warqadda Guddoomiyaha Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo Lr.

1/2023, Xeer Lr. 2/2023, taariikh 9/12/2023, Xeer Lr. 3/2023, ee ku
taariikhaysan 30/12/2023 kuna saabsan ansixinta sharciyada kor ku xusan

Markuu Tixgeliyey:

Baahida loo qabo in la ansixiyo sharciyadan sidoo kalena la meelmariyo.

Wuxuu Soo Saaray Hoggaamiyuhu sharcigan:

QODOBKA 1aad

Laga bilaabo taariikhda uu Hoggaamiyuhu Saxiixo sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta sharciyada kor ku xusan.

QODOBKA 2aad

DHAQANGALKA SHARCIGAN

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa Marka uu Hoggaamiyuhu saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Maamulka.

Wadashaqayn Wacan

Mud. Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali

Hoggaamiyaha Maamulka SSC-Khaatumo, Soomaaliya

Page 1 of 1



Maamulka SSC-Khaatumo
Xafiiska
Guddoomiyaha Golaha
Dhexe



إدارة اس اس سي خاتومو
مكتب
رئيس المجلس المركزي

SSC-Khatumo Administration
Office of the Chairman
The Central Council

SUMMAD: GDH/XG/0010/122023

Tr: 30/12/2023

Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Cashuuraha Berriga ee Maamulka SSC-Khaatumo

Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo;

Markuu arkay soo gudbinta Golaha Fulinta ee Maamulka SSC-Khaatumo ee Hindishe Sharciyeed Maamulka Guud ee Maaliyadda;

Markuu arkay baahida degdega ah ee loo qabo xeer lagu maamulo hawlaha maaliyadda ee Maamulka SSC-Khaatumo;

Markuu arkay Qodobka 8-aad farqadiisa 2-aad ee Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo ee awooda sharci dejinta u xilsaaray Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo;

Markuu dooda qotada dheer ee Xubnaha Golaha Dhexe ka yeesheen Xeerkan, lana marsiiyey habraaca xeer dejinta sida uu dhigayo Xeer Hoosaadka Golaha Dhexe;

Markuu arkay ansixinta Golaha Dhexe ee Hindose Sharciyeedka oo qabsoontay markay Taariikhdu ahayd 9/12/2023

Waaxa uu halkan ugu soo gudbinayaa Hogaamiyaha Golaha Fulinta ee Maamulka SSC-Khaatumo ansixinta Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023 si uu uga guto waajibaadkiisa ku dhigan Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo.

Gudoomiyaha Golaha Dhexe

Mudane Jaamac Yaasiin Warsame

Xoghayaha Guud ee Golaha Dhexe

Cabdilaahi Cabdiraxmaan Maxamed





Table of Contents

CUTUBKA 1: HORDHAC.....	7
<i>Qodobka 1: Magaca Xeerka</i>	<i>7</i>
<i>Qodobka 2: Eray Bixinta Xeerka</i>	<i>7</i>
<i>Qodobka 3: Ujeedada Xeerka</i>	<i>8</i>
<i>Qodobka 4: Baaxadda Xeerkan.....</i>	<i>8</i>
<i>Qodobka 5: Uruurinta Dakhliga.....</i>	<i>9</i>
CUTUBKA 2: CASHUURTA DAKHLIGA (Income Tax)	9
<i>Qodobka 6: Ilaha Dakhliga La Cashuurayo (Taxable Source Of Income)</i>	<i>9</i>
<i>Qodobka 7: Sanad Cashuureedka.....</i>	<i>9</i>
<i>Qodobka 8: Deganaashaha (Residents)</i>	<i>10</i>
<i>Qodobka 9aad: Wakiilada Dadka Baahiyaha Gaarka Ah Qaba Iyo Dadka Aan Deganayn Maamulka Gudahiisa.....</i>	<i>10</i>
<i>Qodobka 10: Cashuurta Ku Waajibaysa Sayga Iyo Ooridiisa.....</i>	<i>11</i>
<i>Qodobka 11: Laba cashuurida Dakhli Isku mid ah.</i>	<i>11</i>
<i>Qodobka 12: Caddaynta Cashuurta Dakhliga.....</i>	<i>11</i>
<i>Qodobka 13: Lacag -Bixinta Saddex Biloodka ah.</i>	<i>12</i>
<i>Qodobka 14: Kharashaadka/Dakhliga aan La Cashuuri Karin.....</i>	<i>12</i>
<i>Qodobka 15: Saldhigga Qiima Dhaca (Depreciation)</i>	<i>12</i>
<i>Qodobka 16: Qiima -Dhaca Hantida</i>	<i>13</i>
<i>Qodobka 17: Kharashaadka Tababarada Iyo Cilmi Baarista.....</i>	<i>14</i>
<i>Qodobka 18: Deyn Xumaatay (Bad debt)</i>	<i>14</i>
<i>Qodobka 19: Khasaare wali taagan (Loss Carried Forward).....</i>	<i>14</i>
<i>Qodobka 20: Qiimaynta Kala Wareejinta Sicirka Ee Shirkadaha Xirirka Leh (Transfer Pricing Between Related Companies)</i>	<i>14</i>
<i>Qodobka 21: Dakhli Maaliyadeedka (Financial Income)</i>	<i>15</i>
<i>Qodobka 22: Dakhliga Macaashka Lahaanshaha (Royalty Income).....</i>	<i>15</i>
CUTUBKA 3: CASHUURTA DAKHLIGA SHIRKADAH (Corporate Income Tax).....	16
<i>Qodobka 23: Saldhiga Cashuurta Dakhliga Shirkadaha.</i>	<i>16</i>
<i>Qodobka 24: Cashuur Bixiyeyaasha Ku Waajibtay Cashuurta Dakhliga Shirkadaha 16</i>	
<i>Qodobka 25: Shirkadaha Laga Dhaafay Cashuurta Dakhliga.....</i>	<i>16</i>
<i>Qodobka 26: Baaxadda Mas'uuliyadda Cashuurta Dakhliga Shirkadaha.....</i>	<i>16</i>
<i>Qodobka 27: Qiimaha Laga Cashuurayo.....</i>	<i>17</i>
<i>Qodobka 28: Qaabka Cashuurta Dakhliga Shirkadaha. (Corporate Income</i>	





Taxation)	17
Qodobka 29: Shirkadaha Wadaaga Maamulka Iyo Dadka (Public Private Partnership)	17
Qodobka 30: Cashuurta Dakhliga Ka Soo Gala Kirada Hantida Guurtada Iyo Ma Guurtada Ah	17
Qodobka 31: Dib-U-Habaynta Shirkadda.....	17
Qodobka 32: Cashuuraha Shirkadaha Dib U Habaynta Lagu Sameeyey.....	18
Qodobka 33: Cashuurta Shirkad Kacday (Musaliftay).....	18
CUTUBKA 4: CASHUURTA DHEEFTA HANTIDDA (CAPITAL GAIN TAX).....	19
Qodobka 34: Saldhiga Cashuurta Dheefta Hantidda	19
Qodobka 35: Hantidda Ay Ku Waajibtay Cashuurta Dheefta Hantidda	19
Qodobka 36: Hantidda Laga Dhaafay Cashuurta Dheefta Hantidda.....	19
Qodobka 37: Qaabka Xisaabinta Cashuurta Dheefta Hantidda	19
Qodobka 38: Cadaynta Iyo Bixinta Cashuurta Dheefta Hantidda.....	19
CUTUBKA 5: CASHUUR KA REEBID (WITHHOLDING TAX).....	20
Qodobka 39: Saldhiga Cashuur Ka Reebidda.....	20
Qodobka 40: Cashuur Ka Reebidda Cashuuraha Qofka	20
Qodobka 41: Cashuurta Ka Reebidda Cidkasta Oo Ma Deggane Ah.	20
Qodobka 42: Cashuurta Qofka aan Loo Samayn Cashuur Ka Reebid.....	21
Qodobka 43: Cashuur Ka Reebidda Alaabta Ganacsiga ah ee La Soo Dajiyo.....	21
Qodobka 44: Cashuur Ka Reebidda Qandaraasyadda.....	21
Qodobka 45: Wakhtiga La Cadaynta Iyo bixinayo Cashuur Ka Reebida	21
Qodobka 46: Ku Guuldareysiga In La Reebo Cashuurta.....	22
Qodobka 47: Diiwaanka Lagu Hayo Cashuur Ka Reebidda.....	22
CUTUBKA 6: CASHUURTA DIIWAANGALINTA (Registration Tax)	22
Qodobka 48: Saldhiga Cashuurta Diiwaangelinta.....	22
Qodobka 49: Falalka Iyo Qoraallada Cashuurta Ku Waajibayso.....	22
Qodobka 50: Cadaynta Bixinta Cashuurta Diiwaangelinta.....	23
Qodobka 51: Qoraaladda Laga Dhaafay Cashuurta Diiwaangelinta.....	23
Qodobka 52: Qiimaha La Cashuurayo Diwaangalinadda.....	23
Qodobka 53: Saldhiga Cashuurta Diwaangalinta Kala Wareejinta Hantida.....	23
Qodobka 54: Qaabka Cashuurta Kala Wareejinadda.....	23
Qodobka 55: Hantida Laga Dhaafay Kala Wareejinadda.....	24
Qodobka 56: Taariikhda Cadaynta Cashuurta Dakhliga Hantida Kala Wareejinta.	24
Qodobka 57: Qiimaha La Cashuurayo Dakhliga Kala Wareejinadda Hantida.	24





CUTUBKA 7: CASHUURTA GADISTA (SALES TAX).....	25
<i>Qodobka 58: Saldhiga Cashuurta Gadista.</i>	<i>25</i>
<i>Qodobka 59: Adeegyadda Iyo Badeecaddaha ay Ku Waajibayso Cashuurta Gadista.</i>	<i>25</i>
<i>Qodobka 60: Fulinta Waajibaadka Cashuurta Gadista.</i>	<i>25</i>
<i>Qodobka 61: Adeegyadda Iyo Badeecaddaha Laga Dhaafay Cashuurta Gadista.</i>	<i>26</i>
<i>Qodobka 62: Qaabka Daabacadda Qaansheegadka.</i>	<i>26</i>
<i>Qodobka 63: Sugidda Qiimaha La Cashuurayo.</i>	<i>26</i>
<i>Qodobka 64: Qiimaha La Cashuurayo.</i>	<i>27</i>
<i>Qodobka 65: Cadaynta Cashuurta Gadista.</i>	<i>27</i>
<i>Qodobka 66: Soo Xareenta Cashuur Gadista.</i>	<i>28</i>
CUTUBKA 8: CASHUURTA WADA MARISTA (ROAD TAX)	28
<i>Qodobka 67: Saldhiga Cashuurta Wada Marista</i>	<i>28</i>
<i>Qodobka 68: Diwaangalinta Gaadiidka ay Ku Waajibtay Cashuurta Wada Maristu.</i>	<i>28</i>
<i>Qodobka 69: Gaadiidka Leh Cashuur Dhaafka Joogtadada Ah</i>	<i>28</i>
<i>Qodobka 70: Ogolaansho Fasax Ku Meel gaadh Ah</i>	<i>29</i>
<i>Qodobka 71: Wadashada Warqadda Caddeynta Bixinta Cashuurta.</i>	<i>29</i>
<i>Qodobka 72: Qaabka Qaadista Cashuurta Gaadiidka.</i>	<i>29</i>
<i>Qodobka 73: Qiimaha La Cashuurayo Cashuurta Wada Marista.</i>	<i>30</i>
<i>Qodobka 74: Ku Guul Daraysiga Bixinta Cashuurta Wada Marista.</i>	<i>30</i>
<i>Qodobka 75: Baabuurta Fadhida Ee Aan Shaqaynan.</i>	<i>30</i>
CUTUBKA 9: CASHUURTA MOORKA (Stamp Tax)	31
<i>Qodobka 76: Saldhiga Cashuurta Moorka</i>	<i>31</i>
<i>Qodobka 77: Cashuurta Moorka (Stamp Tax)</i>	<i>31</i>
<i>Qodobka 78: Qiimayaasha Cashuurta Moorka Cayiman</i>	<i>31</i>
<i>Qodobka 79: Cashuurta Moorka Ee Boqolleyda Ah (Proportional Tax).....</i>	<i>32</i>
<i>Qodobka 80: Qoraalada Laga Dhaafayo Cashuurta Moorka</i>	<i>33</i>
<i>Qodobka 81: Been Abuurka Iyo Laba Jeer Adeegsiga Moorka</i>	<i>33</i>
<i>Qodobka 82: Gaddida Iyo Isticmaalka Tigidyada Iyo Warqadaha Moorka</i>	<i>33</i>
<i>Qodobka 84: Xil Gudashada Cashuurta Moorka.....</i>	<i>33</i>
<i>Qodobka 85: Qiima Dhaca Tigidyada Moorka</i>	<i>34</i>
CUTUBKA 10: QODOBADA QUBANAHA AH.....	34
<i>Qodobka 86: Ganaaxyadda.....</i>	<i>34</i>
<i>Qodobka 86: Ajuurooyinka Iyo Shatiyadda.</i>	<i>34</i>





Qodobka 87: Shaxaha Cashuuraha.....	35
Qodobka 88: Xeer Nidaamiye.....	35
Qodobka 89: Burin.....	35
Qodobka 90: Dhaqangal.....	35
Lifaaqa 1: Cashuur Ka Reebid (la xariira Qodobka 65aad).....	36
Lifaaqa Labaad: Shaxaha Cashuuraha	37




CUTUBKA 1: HORDHAC

Qodobka 1: Magaca Xeerka

Magaca xeerkani waa "Xeerka Dakhliga Cashuuraha Berriga"

Qodobka 2: Eray Bixinta Xeerka

1. **Maamul:** Waxaa loola jeedaa Maamulka SSC-Khaatumo ee Soomaaliyeed.
2. **Axdii:** Waxaa loola jeedaa Axdiga lagu dhisay Maamulka SSC-Khaatumo.
3. **Hoggaamiye:** Waxaa looga jeedaa Hoggaamiyaha Maamulka SSC-Khaatumo.
4. **Xafiiska:** waxaa loola jeedaa Xafiiska Maaliyadda Maamulka SSC-Khaatumo.
5. **Xoghayaha:** Waxaa loola jeedaa Xoghayaha Xafiiska Maaliyadda.
6. **Cashuur-bixiye:** waxaa loola jeedaa shakhsi kasta ama hay'ad leh shakhsiyad qaanuuni ah oo ay tahay in ay cashuur bixiso si waafaqsan xeerkan.
7. **Sanad-cashuureed:** waxaa loola jeedaa xilliga la qoodeeyo canshuuraha sanadkaas ee lagu daray miisaniyada isla sanadkaas.
8. **Cashuur Bixiye:** macnaheeddu waa cidkasta oo hela qadar cashuur galka ah sida xeerkan waafaqsan waxaana ku jira kuwan:
9. **Cashuur ka Reebid (Withholding Tax):** waxaa loola jeeda in cashuur laga reebo qof kasta oo cashuur ku waajibtay kaas oo uu ka reebayo qofka siinaya lacagta dakhli ee uu kasbaday kan laga reebayo.
10. **Cashuur/dakhli (Revenue/Tax):** waxaa loola jeeda lacag ka timid cashuuro, ajuurooyin, hanti dowladdeed oo la gaday, la xaraashay ama la kireeyey, deeqaha, ganaax, ama lacago kale uu xeerkani soo rogay ama xeer kale cayimay.
11. **Dakhli (Income):** waxaa loola jeeda lacag soo gashay qof ama shirkad ay ku heleen adeeg ay qabteen, howlo shaqo ama laga helay maalgashi.
12. **Faa'iido/Macaash (Profit):** waa faa'iiddadda maaliyadeed oo lagu kasbaday marka macaashkaagu ka bato kharashaadkaaga iyo qiimaha asalka ee howlgal kaan kugu jooga.
13. **Ganacsade Jumlo:** waxaa loola jeedaa Cid kasta oo awood sharciyadeed u leh in ay badeecad jumlo ah ama xoolo nool ah soo galiyeen ama ka dhoofiyaan dhulka Maamulka.
14. **Loo Shaqeeye:** waxaa loola jeeda qof, shirkad, hay'ad ama urur howlgaliya shaqaale mudo cayimin bixiyana xuquuqdooda shaqaalanimo.
15. **Mabaadi'da Xisaabaadka ee Guud:** waxaa loola jeeda nidaam xisaabeed caalami ah taas oo dunidda isla ogoshahay, hay'adda caalamiga ah IFAC ay aqoonsantahay. Waxaa uu noqon karaa GAAP, IFRS iyo wixii la halmaala.
16. **Moor:** Waxaa loola jeedaa cashuur raacda cashuur kale waana laba nooc mid sawir ah oo lagu dhajiyo qoraaladda loo adeegsaddo hab sharci ah iyo mid boqolay ahaan loo xisaabo oo lagu dhuftay cashuur kale ama qaansheegad.
17. **Qof:** waxaa loola Qof caadiya (Natural Person) ama Qof macma ah (juridical Person).





18. **Sannad Xisaabeed:** waxaa loola jeedaa xiliga Shirkaddu u aqoonsantahay in ay xisaabteeda sannadlaha ah xirato, sannad xisaabeedka waxaa uu waafaqi karaa sannad Cashuureedka maamulka.
19. **Shaqaaale:** waxaa loola jeeda qof kasta oo fuliya howl cayiman bedel keedana helaya.
20. **Shirkad:** waxa loola jeedaa hay'ad ama urur kasta oo leh jiritaan madax-bannaan oo qaanuuni ah isla markaana oogi karta laguna oogi karo dacwad, kana madax banan saamilayda, isla markaasna ay ku waajibtay cashuurta dakhliga shirkaddaha (Corporate Income Tax).
21. **Soo Dejiye:** waxaa loola jeedaa Cid kasta oo badeecad soo galisa xuduudaha Maamulka ee dhulka iyo Garoomadda diyaaradaha,
22. **Wakiilka Sharciga ah:** Waxaa loo jeeda wakiilka dadka garaadka dhimman, waxba qabsan karin, qaangaadhka ahayn iyo dadka maqan.
23. **Warshad:** waa makiinado meel ku rakiban oo qalab cusub curin kara, qaarna dhalan rogi kara, kuwa kalena farsamayn kara.
24. **Xirfadle:** waxaa loola jeeda qofka haysta xirfad cilmi sida dakhtarnimo, qareen, xisaabiye ama xirfadle farsamo sida nijaarka, makaaniga iyo shaqooyinka la halmaala kaas oo ugu shaqaysto si madax banaan dakhliina kasoo galo xirfadiisa.

Qodobka 3: Ujeedada Xeerka

Ujeeddoyinka Xeerkan waa:

1. In lagu maamulo Dakhliga Cashuuraha Berriga.
2. In lagu cadeeyo hanaanka Dakhli Uruurinta.
3. In lagu qeexo qaybaha cashuuraha Berriga.

Qodobka 4: Baaxadda Xeerkan

Xeerkan wuxuu ka dhaqangelyaa dhulka Maamulka wuxuuna saamaynayaa dakhliyadda kala ah.

1. Cashuurta dakhliga qofka (Personal Income Tax);
2. Cashuurta dakhliga shirkadaha (Corporate Income Tax);
3. Cashuurta Dheefta Hantidda (Capital Gains Tax);
4. Cashuur ka reebid (With Holding Tax);
5. Cashuurta Diwaangalinta.(Registration Tax);
6. Cashuurta gadista (Sales Tax);
7. Cashuurta Wadamarista (Road Tax);
8. Cashuurta Moorka (Stamp tax);
9. Ganaaxyadda iyo Ciqaabta (Penalties and Fines);
10. Ajuurooyinka iyo shatiyadda (Fees and licences).



Qodobka 5: Uruurinta Dakhliga.



1. Xafiiska Maaliyadda iyo cidii ay wakiillato oo kaliya ayaa uruurin kara cashuuraha uu waajibiyeey Xeerkan iyo xeerarka kale ee Maaliyadda.

CUTUBKA 2: CASHUURTA DAKHLIGA (Income Tax)

Qodobka 6: Ilaha Dakhliga La Cashuurayo (Taxable Source Of Income)

1. Adeegyada iyo shaqada nooc kasta oo ay tahay.
2. Howlaha Xirfadlayaasha, Suugaanta masraxada, Majaajilooyinka maaweelooyinka iyo ciyaaraha;
3. Adeegsiga, iibinta, kiraynta, wareejinta dhaxalka ama hibadda ee hantida guurtada ah iyo ma guurtaba ;
4. Beerashada dalagga, ganacsiga beera xoolalayda, kalluumaysiga, Macdanta, Shidaalka, hawlaha kaymaha iyo khayraadka dabiiciga ah ee laga helo dhulka korkiisa ama gudihiisa;
5. Macaashka qandaraasyadda iyo Heshiiyadda;
6. Maalgelinta saamiyada shirkadaha;
7. Iibinta tooska ah ama dadban ee saamiyada ama deymaha;
8. Macaashka saamiyadda oo dib loogu celinayo saamiyadda raasumaalka;
9. Qaybsiga macaashka wadaagga ah;
10. Dakhliga kasta oo laga helay amaah wadanka gudihiisa lagu qaatay;
11. Wareejinta, iibinta iyo kiraynta hantida;
12. Dakhliga rarka gaadiidka xamuulka ah;
13. Soo dajinta iyo dhoofinta badeecadaha;
14. Macaashka adeegsiga xuquuqda lahaanshaha (Royalty Income);
15. Cid kasta oo ka samaysa dakhli gudaha Maamulka waxaa ku waajibaysa cashuur.

Qodobka 7: Sanad Cashuureedka

1. Sannad Cashuureedku wuxuu bilaabmaya 1-da Janaayo wuxuuna dhammaanayaa 31-da Diseember sannad kasta;
2. Hadii ay jiraan hayaddo ganacsi ama maamul uu sannad xisaabeedkoodu ka duwan yahay kan lagu sheegay farqadda koowaad ee qodobkan, waxaa looga baahanyahay qoraal ay u soo gudbiyaan maamulka dakhliga si loogu diwaangaliyo xili xisaabeedkooda loona ogolaado in ay isticmaalaan Sannad xisaabeed u gaar ah;
3. Marka waqtiga xisaab xirka cashuur bixiyuhu is beddelo, wuxuu soo cadaynayaa xiliga xisaab xirkiisa uu ka bilowday iyo goorta uu dhammaanayo;





4. Cashuurta dakhligu waxay ku waajibaysaa sannad kasta oo la qiimeeyo caddadka guud ee Faa'iidadda saafiga ah oo uu qofku ama shirkaddu heshay mudadda sannadka ah;
5. Sannad Cashuureedku waa sannadka ka horeeyey Xiliga qiimaynta waana sannadka la helay dakhliga la cashuurayo.

Qodobka 8: Deganaashaha (Residents)

1. Degnaanshaha waxaa loo jeeda qof ama shirkadd deggan gudaha Maamulka waxaana uu noqon karaa muwaadin ama ajnabi sharci ku jooga, isla markaasna ka diwaangashan maamulka dakhliga;
2. Qofku haduu SSC-Khaatumo deggan yahay sannad cashuureed cayiman, waxaa loo aqoonsanyaa "Deggane" haduu buuxiyo qodobadda soo socda midkood:
 - a. Qof ku leh Guri/Hooy SSC-Khaatumo;
 - b. Muwaadin soomaaliyeed oo degan oo ka shaqeeya gudaha SSC-Khaatumo;
 - c. Qof shaqo joogta ah ku haysta gudaha SSC-Khaatumo;
 - d. Qof u dhashay SSC-Khaatumo oo jooga meel ka baxsan dhulka Maamulka;
 - e. In uu ku sugan yahay gudaha Maamulka muddo dhan celcelis ahaan 182 maalmood oo kamid ah 365 maalmood ee sannad cashuureedka la qiimaynayo.
 - f. In sannad cashuureedka la qiimaynayo iyo labadii sano oo ka horeeyay uu dalka gudihiisa ku sugnaa mudo celcelis ahaan dhan 121 maalmood sannadkiiba;
 - g. Shirkad walba oo leh Shati Ganacsi oo ka diwaangashan, kana howlgasha gudaha Maamulka waxay noqonaysaa deggane.

Qodobka 9aad: Wakiilada Dadka Baahiyaha Gaarka Ah Qaba Iyo Dadka Aan Deganayn Maamulka Gudihiisa.

1. Qofka Garaadka dhimman ama aan waxba qabsan Karin, ee leh howlo dakhli abuur, waxaa la qiimaynayaa cashuurta ku waajibtay, waxaana masuuliyadda bixinta cashuurta qaadaya wakiilkiisa sharciga ah;
2. Qofka aan degganayn dalka waxaa la qiimeynayaa cashuurta ku waajibaysa hantida iyo ganacsigiisaba, waxaana masuuliyadda bixinta cashuurta qaadaya wakiilkiisa sharciga ah ama maamulaha hantidda;
3. Hadii Qofkaas ama wakiilkiisa sharciga ah ay magacaaban waayaan wakiil. Kuna soo wargelin waayaan magacaabista xafiiska Maamulka dakhliga, waxaa sharci ahaan looga joojinayaa dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo isticmaalka hantidda ilaa la helo wakiil sharci oo la wareega masuuliyadda cashuuraha.





Qodobka 10: Cashuurta Ku Waajibaysa Sayga Iyo Ooridiisa

1. Sayga iyo ooridiisu midkasta gaarkiisa ayuu u bixinayaa Cashuurta dakhliga si ku saleysan dakhligooda, hadii ilaha dakhligoodu kala gaar yahay ama uu ka abuurmo ganacsiyo kala madax bannaan.
2. Hadii sayga iyo ooridiisa ay ganacsi wadaagaan ama Hanti wada leeyihiin, cashuurta waxaa laga qaadayaa magaca labada is qaba midkood ee masuulka ah ganacsiga.

Qodobka 11: Laba cashuurida Dakhli Isku mid ah.

1. Dakhli laba jeer la cashuuri karo ma jiro, xitaa hadii qofka ama shirkadda magacyadooda isbadalaan.
2. Hishiisyadda ka hoos abuurma hishiish kale (sub contract), waxaa gaar loogu yeelanayaa cashuuraha ku waajibay, xitaa hadii ay isha dakhliga ay la mid tahay heshiiska asalka ahaa.

Qodobka 12: Caddaynta Cashuurta Dakhliga.

1. Xiliga caddaynta cashuurta Dakhliga sannadka waxay bilaabanaysaa 1da Janaayo waxayna soconaysaa ilaa 31da Maarso, mudadaas cashuur bixiye kasta waxa uu fursad u haystaa in uu soo caddeeyo dakhliga sannadkii la soo dhaafay.
2. Cidkasta oo deggane ah kana diwaangashan maamulka dakhliga, waxaa waajib ku ah in ay soo xarayso caddaynta cashuurta dakhliga sannadka, si waafaqsan habraacyada maamulka dakhliga, ugu dambayn 31da Maarso ee xiliga caddaynta cashuurta.
3. Hadii aan wax dakhli ah kasoo galin gudaha Maamulka waa in uu keenaa cadaynta muujinaysa in macaashkiisu eber yahay sannad cashuureedkaas (Zero declaration). cidii uu ku guuldaraysto in uu soo cadeeyo waxaa laga qaadayaa ganaax lacageed.
4. Cid kasta oo fulisa waxqabadyada dakhli abuur , waa in ay usoo gudbiyaan Maamulka dakhliga, qaabaysanaha(Form) cadaynta cashuurta iyaddoo ay weheliso xisaab xirka xaashida dheelitirka (Statement of Financial Position) iyo xisaab xirka faa'idadda & khasaaraha (Statement of Profit or loss), diwaanka gadashadda badeecadda (Goods Received Note) ama wax soo saarka warshadda(Manufacture Registry) iyo lifaaqyada kale ee muhiimka ah ee muddo cashuureedkaa, iyadoo loo eegayo mabaadi'da xisaabaadka guud ee lay isla aqoonsan yahay iyo dukumentii kasta oo kale oo khuseeya oo ayu baahanyihiin maamulka dakhliga.
5. Cashuur bixiyaasha isticmaala sannad cashuureed ka duwan midka maamulka Dakhliga waa inay haystaan caddaynta cashuur sannadeedka iyo xisaab xiradda maaliyadeed oo uu dheelitiray hubiyeyna xirfadle xisaabeed oo la' aqoonsanyahay.



Qodobka 13: Lacag -Bixinta Saddex Biloodka ah.

1. Cashuur bixiyaha aan ku bixin karin cashuurta faa'iidaddaa sannadka hal mar, waxaa uu soo gudbinayaa dhammaan cadaaymaha taageeraya sababta uu u bixin karin cashuurta hal mar. Ka dib qiimaynta maamulka Dakhliga, waxay qoraal ku ogaysiin doonaan cashuur bixiyaha in la aqbalay codsiigisa iyo in kale.
2. Hadii loo ogolaado codsigiisa, Cashuur bixiyuhu waa in ku bixiyaa cashuurta sannadka loo qiimeeyey kama dabayn 2-da Maajo, 2-da Agoosto iyo 2-da Nofeember xilli cashuureedka. Ugu badnaan saddex qaybood buu u qaybsan karaa cashuurta ku waajibtay mar walbana waa inuu bixiyo ugu yaraan soddon iyo saddax boqolkiiba (33%) waajibaadka cashuurta.
3. Haddii cashuur bixiyuhu isticmaalo xisaab xir sannadeed ka duwan sannad cashuureedka xeerkan (Fiscal Year) waxaa la waafajinayaa qodobka 7aad ee xeerkan.

Qodobka 14: Kharashaadka/Dakhliga aan La Cashuuri Karin

Kharashyada soo socda lagama jari karo dakhliga la cashuuri karo:

1. Saami-qaybsiga lagu dhawaaqay ee macaashkii la siiyay saamilayda;
2. Gunooyinka loo keydiyey shaqaalaha si loo siiyo mustaqbalka;
3. Qiima dhaca hantidda ee shirkaddaha soo gudbisadaan;
4. Taburacaadka loo kaydiyey deeqaha la siiyo ururada aan macaash doonka ahayn (non-profit organizations) oo aan qiimihiisu dhaafin boqolkiiba hal (1%) faa'iidada guud;
5. Cashuurta ka reebida uu ka sameeyey shaqaalaha ama cashuur bixiye kale iyo cashuurta Gadista (Sales tax);
6. Kharashaadka isticmaalka qof ahaaneed;
7. Kharashaadka madadaalada ee shaqaalaha ee aan la xiriirin arimaha shaqadda;
8. Kharaashadka guud ee ka dhaxeeya ganacsiyo kale duwan (Overhead cost) oo aan la kale saari Karin kana badan Boqolkiiba labaatan (20%) faaidada guud;
9. Iibsiga hantidda Cimriga Dheer (Non-Current Asset);
10. Kharashaadka lagu bixiyo arimaha maamulka, adeegyada farsamada iyo khidmadaha lahaanshaha (Royalty) oo la siiyo cid aan deganayn SSC-Khaatumo.

Qodobka 15: Saldhigga Qiima Dhaca (Depreciation)

1. Saldhigga qiima dhaca ee hantida wuxuu ku xiran yahay isbadalka dhinnaanshe (diminishing) ee ku dhacay iibsigii asalka ahaa iyo wixii kordhin lagu sameeyey hantida (Capital expenditure).
2. Hantida ku qiimaysan nidaamka isku xirka ah (Pooling), sicir dhimistoodu waa qiimaha shayga ee ku cad xisaab xirka dheelitirka (Financial Position) ee bilowga





xilliga cashuurta:

3. Wixii kordhin lagu sameeyey (Capital expenditure) hantida ku qiimaysan nidaamka isku xirka ah ee xiliga cashuurta waxay kordhinaysaa qiimaha asalka ahaa.
4. Waxaa hoos u dhacay qiimaha lagu iibiyey hantida ama caymis (Insurance) laga helay hantida ku luntay masiibooyin dabiici ah ama bedelid kale ee muddada cashuurta.
5. Haddii sicir dhimista ama qiimaha asalka ah yahay (2,000) oo USD dollar ah iyo wixii ka yar, saldhigga qiima dhaca oo dhan waxaa loo arkaa inuu yahay kharash laga jari karo sannad cashuureedkaas.

Qodobka 16: Qiima -Dhaca Hantida

1. Qiimo dhaca hantida guurta iyo maguurtada ah ee ganacsiga waxaa laga jarayaa dakhliga la cashuuri karo;
2. Dhismayaasha, qalabka warshadaha culus iyo makiinadaha ayaa sannad walba qiimo dhimis lagu samaynayaa, mid walbana goonidiis waxaa lagu saleynayaa heerka qiima dhacooda ee u dhigma Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.13 ee Qiima dhaca Hantidda;
3. Hantida dahsoon (intangible Asset) oo ay ka mid yihiin sumcadda wanaagsan (Goodwill) ee laga soo iibsado gacan saddexaad (Third Party), ayaa sannad walba la qiimeenayaa iyadoo lagu saleynayo heerka qiima dhaca ee lagu cadeeyey Shaxda 3.13 ee Qiima dhaca Hantidda;
4. Qalabka isgaarsiinta ee noloshoodu ka badan tahay toban (10) sano ayaa sannad walba la qiimeenayaa iyadoo lagu saleynayo heerka qiima dhaca Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.13 ee Qiima dhaca Hantidda;
5. Hantida ku jirta labada qaybood ee soo socda ayaa lagu qiimaynayaa nidaamka isku xirka (Pooling System) laguna salaynayo qiimayaasha soo socda:
 - a. Kombiyuutarrada, qalabyada iyo hababka isgaarsiinta ee noloshoodu ka yar tahay toban (10) sano, qiima dhacoodu wuxuu noqonayaa Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.13 ee Qiima dhaca Hantidda;
 - b. Hanti kasta oo ganacsi ee noloshoodu ka yar tahay toban (10) sano qiima dhacooda waxaa uu noqonayaa Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.13 ee Qiima dhaca Hantidda;
 - c. Hoos u dhaca ku yimaada hantida kiraysan waqtiga dheer (leased asset), waxaa loo ogolyahay kiraystaha in loo qiimeeyo qiima dhaca hantida mudada uu isticmaalayo. Qiimaha asalka ah waxaa u dhigmaya qiimaha guud ee kiradda. si loo hubiyo jiritaanka kirada hantida waa in cadaymaha heshiiska lala soo wadaagaa maamulka dakhliga;
 - d. Dhulka, farshaxanka, waxyaalaha qadiimiga ah, dahabka iyo wixii kale ee hanti ahee aan gabow lahayn lama qiimaynayo.





Qodobka 17: Kharashaadka Tababarada Iyo Cilmi Baarista

1. Inta lagu jiro xilliga cashuuraha, dhammaan kharashyada tababarka iyo cilmi baarista ee uu bixiyo cashuur-bixiye kuna dhiirrigeliyo howlaha ganacsiga, waxaa loo tixgelinayaa kuwa laga jari karo (deductible) dakhliga la cashuurayo;
2. Kharashaadka ku baxa tababarka iyo cilmi-baarista ee kor u qaadida hawlaha ganacsiga, kuma jiraan dib u habaynta, dayactirka, sahrinta iyo iibsashadda hantidda ma guurtadda ah sida dhulka, dhismayaasha iyo hanti kasta oo maguurta ah.

Qodobka 18: Deyn Xumaatay (Bad debt)

1. Go'aaminta faa'iidadda ganacsiga waxaa loo ogoloyahay in laga jaro deymaha xumaaday haddii shuruudaha soo socda ay buuxiyaan;
 - a. Haddii qaddar u dhiganta deynta hore loogu daray dakhliga cashuur bixiyaha;
 - b. Haddii deynta laga saaray buugaagta xisaabaadka cashuur bixiyaha;
 - c. Haddii cashuur bixiyuhu qaaday dhammaan tallaabooyinka suurtoogalka ah ee dabagalka lacag bixinta sida go'aan maxkamadeed oo tusaya ka xayuubinta deynta.
2. Cid kasta deyntiisu ay ka yar tahay toban kun oo dollar (10,000) marka loo tixraaco xaaladaha lagu tilmaamay xarfaha (a) iyo (b) ee Faqradda Koowaad ee qodobkan, cashuur bixiyuhu waa inuu keenaa caddayn ah inuu qaaday tallaabooyin macquula oo ku siman muddo saddex (3) sano ah si loo soo celiyo deynta;
3. Faa'iidadda ganacsiga waxaa lagu kordhina yaa dhammaan lacagta laga soo ceshay deymaha xumaaday ee laga jaray.

Qodobka 19: Khasaare wali taagan (Loss Carried Forward)

1. Haddii xisaabinta macaashka ganacsigu uu keeno khasaare muddada cashuurta, khasaara haas waxaa laga jarayaa faa'iidadda ganacsiga ee saddexda sano oo ku xigta sannadka khasaaraha la galay, waxaana la tixgalinayaa khasaarahii hore hadii khasaare ka danbeeya la galo;
2. Khasaaraha shirkadu ku gasho ganacsi ka baxsan gudaha maamulka lagama jarayo faaiidada ganacsiga loomana tixgalinyo.

Qodobka 20: Qiimaynta Kala Wareejinta Sicirka Ee Shirkadaha Xirirka Leh (Transfer Pricing Between Related Companies)

1. Cashuur-bixiyaasha isla xiriira ee ku lug leh macaamil dhexdooda ah, waa inay haystaan dukumentiyada cadaynta heshiiska xiroorkooda;
2. Haddii sidaas la yeeli waayo, maamulka dakhligu wuxuu jaan goynayaa sicirka wax kala iibsiga si waafaqsan xeerarka guud ee sicir beddelidda, waxaana lagu soo saari doona habraac u gaar ah.



Qodobka 21: Dakhli Maaliyadeedka (Financial Income)



1. Dakhliga maaliyadeed waxaa ka mid ah:
 - a. Dakhliga faa'iidadda maalgashiga islaamiga ah;
 - b. Dakhliga kaydsga;
 - c. Dakhliga ka soo xarooda dammaanadaha Maamulka (Government Securities);
 - d. Dakhliga ka soo xarooda Dhigaalka (Income from Bonds);
 - e. Dammaanadaha gorgortanka ah ee Dowladdu soo saarto (Negotiable Security);
 - f. Dammaanadaha ay bixiyaan shirkadaha dadweynaha (Public Companies) iyo kuwa gaarka loo leeyahay (Private Companies), iyo;
 - g. Dakhliga ka soo xarooda dammaanadaha lacagta caddaanka ah.
2. Dhammaan dakhliyadda maaliyadeed ee lagu sheegay farqadda koowaad ee qodobkaan, waxaa lagu cadayn doona dakhliga sannadka.

Qodobka 22: Dakhliga Macaashka Lahaanshaha (Royalty Income)

1. Dakhliga macaashka lahaanshaha waxaa ka mid ah dhammaan lacagaha laga helo bixinta adeegyadda soo socda:
 - a. Isticmaal ama xaq isticmaalka;
 - b. Xuquuqda ikhtiraac nashqad;
 - c. Calaamad ganacsi;
 - d. Qorshe qaacido;
 - e. Xuquuqda daabacaadda suugaanta;
 - f. Farsamada gacanta ama Shaqada sayniska oo ay ku jiraan filimada shaneemada, Cajaladaha loo isticmaalo baahinta raadiyaha ama telefishanka.
2. Qiimaha adeegsiga, ama xaq isticmaalka qalabka warshadaha, ganacsiga, sayniska ama isticmaalka macluumaadka khuseeya aqoonta warshadaha, ganacsiga ama sayniska;
3. Dhammaan Dakhliyadda macaashka lahaanshaha ee lagu sheegay farqadda koowaad ee qodobkaan, waxaa lagu cadayn doona dakhliga sannadka;
4. Isticmaalka khayraadka dabiiciga ah ee wadanka, sida khayraadka laga helo badda, macdanta iyo waxyaabaha dhulka laga qodo, geedaha dabiiciga oo mirahooda ama xabagtooda la dhoofiyo, shidaalka iyo wixii la xariira ee laga soo saaro gudaha maamulka waxaa ku waajibaysa cashuurta macaashka lahaanshaha oo qiimaheeda lagu cadeeyey shaxda 3.14 cashuurta macaashka lahaanshaha ee khayraadka dabiiciga ah, qaabka loo qaadayo cashuurtaan waxaa habraac u gaara kasoo saarayaa Xafiiska.





CUTUBKA 3: CASHUURTA DAKHLIGA SHIRKADAH (Corporate Income Tax)

Qodobka 23: Saldhiga Cashuurta Dakhliga Shirkadaha.

1. Cashuurta dakhliga shirkaddaha waxaa laga qaadayaa faa'iidadda ganacsiga ee ay helaan shirkaduhu sannad cashuureed kasta.
- 2.

Qodobka 24: Cashuur Bixiyeyaasha Ku Waajibtay Cashuurta Dakhliga Shirkaddaha

1. Shirkadaha soo socda waxaa ku waajibay cashuurta macaashka ganacsigooda
 - a. Shirkadaha ku dhisan sharciyada Maamulka ama Soomaaliya ama wadan kale ee dakhli kasoo galo gudaha SSC-Khaatumo;
 - b. Bulshadda iskaashatadda ah iyo laamahooda;
 - c. Xarumaha guud ee ganacsiga (Co-orporative);
 - d. Ganacsiga wadaaga ah (Partnerships);
 - e. Ganacsiyadda kale ee u abuuran in ay sameeyaan macaash.
2. Shirkadaha lagu cadeeyey farqadda 1aad ee qodobkaan wax loo aqoonsanyaa in ay dhammaan howlahooda ganacsi ka helaan dakhli;
3. Shirkadaha ku dhisan qaab wadajira (Groups) oo qaanuuni ah, shirkad walba waxay gaar u cadaynysaa cashuurta faaidada sannadka iyo dhammaan cashuuraha kale ee ku waajibay si kala madax bannaan.

Qodobka 25: Shirkadaha Laga Dhaafay Cashuurta Dakhliga.


1. Cashuurta Dakhliga kuma waajibayso shirkadaha soo socda:
 - a. Hay'adaha maamulka ee aan faa'iido wadaaga la ahayn shirkad kale;
 - b. Hay'addaha ka shaqeeya kaalmadda bulshadda ee maamulka u diwaangashan;
 - c. Hay'addaha Sanduuqyadda horumarinta ee maamulku aqoonsantahay;
 - d. Hay'addaha ama ururradda aan macaash doonka ahayn (Non-Profit Organizations).
2. Hay'adaha laga dhaafay cashuurta dakhliga, waxa looga baahan yahay in ay usoo gudbiyaan Xafiiska xisaab xirkooda ugu dambayn 31 Maarso ka dib xilliga cashuurta.

Qodobka 26: Baaxadda Mas'uuliyadda Cashuurta Dakhliga Shirkadaha

1. Hay'adaha degan gudaha maamulka waxay mas'uul ka yihiin cashuurta faaidada ganacsiga ee xilli cashuureedka sannadka;
2. Hay'adaha aan deganayn waxay mas'uul ka yihiin cashuurta faa'iidada ganacsi ee dakhliga kasoo gala gudaha maamulka sannad cashuureed kasta.



Qodobka 27: Qiimaha Laga Cashuurayo.



1. Faa'iidadda ganacsiga ee la cashuuri karo waxaa lagu soo koobayaa kowda ugu dhow (0) waxaana la cashuurayaa Qiimaha ku cad shaxda 4.1 ee Cashuurta Macaashka Shirkadaha.

Qodobka 28: Qaabka Cashuurta Dakhliga Shirkadaha. (Corporate Income Taxation)

1. Faa'idadda Shirkaddaha waxaa loo xisaabiyanyaa si waafaqsan qodobadda cutubka 4aad ee xeerkan;
2. Shirkadaha yar yar waxay bixinayaan cashuurta qiyaasta ee cadadkeeda lagu tilmaamay si waafaqsan shaxda ku xusan xeerkan;

Qodobka 29: Shirkadaha Wadaaga Maamulka Iyo Dadka (Public Private Partnership)

1. Waxaa loo cashuurayaa sida shirkadaha gaarka loo leeyahay, waxaana dhammaan la marsiinayaa habraacyadda xeerkan, dowladdu waxay dib u sheeganaysaa macaashka saamiga (dividends) ee sannadka iyadoo dakhli ahaan loogu xeraynayo;
2. Qaabka loo maamulayo shirkadahaas waxaa qeexi doona xeer u gaar ah.

Qodobka 30: Cashuurta Dakhliga Ka Soo Gala Kirada Hantida Guurtada Iyo Ma Guurtada Ah

1. Dakhliga kirada hantida ma guurtada ah iyo guurtada ah ee lagu daray hantida Shirkaddaha, taaso ay ku waajibtay cashuurta dakhliga, waxaa lagu mideynayaa wadarta dakhliga ee la cashuuri karo;
2. Hadii si gaara shirkaddu u bixiso dakhliga kirooyinka si waafaqsan madaxa xeerkan, shirkaddu waxay gaar u cadaynysaa dakhliga kirooyinkaas kumana daryso dakhliga shirkadda ee la cashuurayo;
3. Hadii shirkaddu ay tahay mid ka macaashta arrimaha kirooyinka, dakhliga kasoo gala kirooyinka waxay kusoo gudbinaysaa cadaynta sannadka si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 31: Dib-U-Habaynta Shirkadda

Shirkaduhu waxay dib u habayn u samaynayaan sida soo socota:

1. Isku darka labo ama in ka badan oo ah shirkado degan gudaha maamulka oo isku noqday shirkad gaar ah;



2. La wareegidda boqolkiiba konton (50%) ama in ka badan ee saamiyada ama xuquuqda cod bixinta, tiro ahaan ama qiime ee shirkadd deggan SSC-Khaatumo;
3. Lahaanshaha boqolkiiba konton (50%) ama in ka badan hantida iyo deymaha shirkad degan SSC-Khaatumo oo loo wareejiyo shirkad kale oo deggan gudaha maamulka;
4. La wareegidda hantida shirkadda oo dhan si jiritaankeeda loogu beddelo shirkad kale;
5. U qaybinta shirkad degan maamulka laba ama in ka badan oo shirkadood.

Qodobka 32: Cashuuraha Shirkadaha Dib U Habaynta Lagu Sameeyey.

1. Haddii ay dhacdo dib u habayn lagu sameeyey shirkadaha, shirkadda wareejinaysa waa laga dhaafayaa cashuurta marka la qiimeeyo faa'iidada raasumaalka iyo khasaaraha ka soo gaaray dib-u-qaabaynta;
2. Shirkadda la wareegtay lahaanshaha shirkadd kale, waxay qiimaynaysaa hantida iyo deymaha ku lugta leh qiimaha asalka ah shirkadda hore;
3. Shirkadda la wareegtay waa in ay kusoo dartaa cadaynta sannad cashuureedka dhammaan xogta ganacsiyadda ay la wareegtay.

Qodobka 33: Cashuurta Shirkad Kacday (Musaliftay).

1. Shirkadaha kacay, ka dib bixinta deymaha iyo qaybinta hantida hartay, mulkiilayaashii shirkadda kacay waa in ay soo gudbiyaan warbixinta xisaab xirkii ugu danbeyey ee shirkadda, wixii cashuur lagu leeyahay waxay qayb ka yihiin daymaha ay bixinayeen;
2. Cid kasta oo howlo ganacsi ka wada gudaha maamulka ahna cashuur bixiye ka diwaangashan maamulka dakhliga, waxaa waajib ku ah in mudo laba isbuuc ah ogaysiin ku soo siiyo maamulka dakhliga haduu musalafo ama xirayo ganacsigiisa.





CUTUBKA 4: CASHUURTA DHEEFTA HANTIDDA (CAPITAL GAIN TAX)

Qodobka 34: Saldhiga Cashuurta Dheefta Hantidda

1. Cashuurta dheefta Hantidda waxay ku waajibtay cid kasta oo hantidda iska iibinaysa ama iska wareejinsa sida hibo la siinayo qof kale marka laga reebo sayga iyo ooridiisa hantidda ay isku wareejiyaan.

Qodobka 35: Hantidda Ay Ku Waajibtay Cashuurta Dheefta Hantidda

Wareejinta ama iska iibinta hantidda sida:

1. Saamiyadda (Shares);
2. Hantidda ma guurtadda ah.

Qodobka 36: Hantidda Laga Dhaafay Cashuurta Dheefta Hantidda.

1. Hantidda Guurtadda ah;
2. Hantidda Dhaxalka ku kala wareegta;
3. Wareejinta Saamiga Shirkadda wax ka badan 50%;
4. Hantidda Dahsoon (Intangible Asset).

Qodobka 37: Qaabka Xisaabinta Cashuurta Dheefta Hantidda

1. Waxaa la cashuurayaa dheefta hantidda farqiga u dhexeeya, Qiimaha lagu iibiyey hantidda ama qiimaha u dhigma oo ay ka joogto suuqa xilliga;
2. Qiimaha asalka ah ee lagu soo iibsaday hantidda ama qiimaha hantida ay joogtay 10 sano ka hor xiliga iibinta hadii hantidda ay jirto mudo 10 sano ka badan;
3. Wixii horumarin hantiyadeed ee muuqda oo lagu sameeyey hantidda iyo kharaashka ku baxay in uu iibku dhaco sida dulaalka iyo sharciyadda oo cadayn leh bixinteeda;
4. Khasaaraha ka dhasha iibka hantidda waxaa khasaaraha lagu gudi doona dheefaha mustaqbalka mudo saddex sano, oo ka danbaysa xiliga khasaaraha.

Qodobka 38: Cadaynta Iyo Bixinta Cashuurta Dheefta Hantidda.

Shirkaddaha waxay soo raacinayaan Cashuur Sannadeedka:

1. Qofka kaliya waxaa uu ku bixinayaa Saamiyada waxaa looga reebayaa shirkadda uu ka dhacay kala wareejinta saamigaama nootaayada kala qortay kala wareejinta sida lagu cadeeyey qodobka 39aad (5) ee xeerkan;





2. Hantidda ma guurta ah waxaa cashuurta la bixinayaa marka hantidda la kala wareejinayo oo heshiiska nootaayadda ka hor waa in la bixiyaa cashuurta ku waajibtay;
3. Ka dib xisaabinta cashuurta dheefta waxaa ku waajibaysa cashuurta qiimaheeda lagu cadeeyey Shaxda 5.1 ee cashuurta dheefta hantidda.

CUTUBKA 5: CASHUUR KA REEBID (WITHHOLDING TAX)

Qodobka 39: Saldhiga Cashuur Ka Reebidda

1. Cashuur ka reebida waa cashuur ay reebayaan cid kasta oo lagu cadeeyey lifaaqa kowaad ee xeerkan, waxaa loo diwaangalinayaa cashuurtaas cida laga reebayin ay bixiyey.

Qodobka 40: Cashuur Ka Reebidda Cashuuraha Qofka

1. Loo shaqeeya kasta waa in uu ka reebaa cashuurta dakhliga shaqadda shaqaalihiiisa, wuxuuna u bixinayaa cashuurtaas si waafaqsan qodobadda xeerkan;
2. Cid kasta oo ay u kiraysan yihiin guryo ama gaadiid, waxay ka reebayaan cashuurta ku waajibtay dakhliga kiradda ee mulkiilaha si waafaqsan qodobka xeerkan;
3. Shirkaddu marka ay qaybinayso macaashka saamiga sannadka waxay ka reebayaan cashuurta macaashka saamiga si waafaqsan qodobadda xeerkan, waxayna usoo gudbinayaan maamulka dakhliga iyagoo kusoo lifaaqaya cadaaynta macaashka shirkadda;
4. Shirkaddu marka ay bixinayso gunooyinka guddiyadda sare waa in ay ka reebtaa cashuurta ku waajibaysa si waafaqsan qodobka 29aad ee xeerkan;
5. Cashuurta dheefta hantidda ee saamiyadda iyo kala wareejinta hantidda qofka kaliya ah waxaa laga reebayaa cashuurta ku waajibtay si waafaqsan qodobadda xeerkan.

Qodobka 41: Cashuurta Ka Reebidda Cidkasta Oo Ma Deggane Ah.

1. Shaqsiyaadka aan degenayn dalka kana diwaangashaynayn maamulka dakhliga, oo shaqo waqti gaaban ah ka fulinaya gudaha maamulka, waxaa loo shaqeeyuhu ka reebayaa cashuurta ku waajibay markasta, sida ku cad Shaxda 6.1 ee cashuur ka reebidda ma degganayaasha;
2. Waqtiga gaaban waxaa loo aqoonsanayaa ugu badnaan 30 casho, hadii uu mudo intaas ka badan ka shaqaynayaan gudaha SSC-Khaatumo waa in uu haystaa warqadda ruqsadda shaqadda;





3. Dakhliga macaashka lahaanshaha la siiyo shirkaddaha ama shaqsiyaadka wadanka aan daganayn, oo aan samayn cadaynta cashuurta sannadka, waxaa laga qaadaya dakhligaas qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 6.2 Cashuur ka reebidda Macaashka lahaanshaha ma deggane;
4. Qofka ma deganaha ah marka uu wadanka ka baxayo waa in uu haystaa waraaq da cadaynta cashuur bixiyaha ee uu bixiyo maamulka dakhliga.

Qodobka 42: Cashuurta Qofka aan Loo Samayn Cashuur Ka Reebid.

1. Marka hay'addu aysan masuuliyadd ka saarnayn cashuur ka reebid si waafaqsan heshiisyadda caalamiga ah, masuuliyadda bixinta cashuurta waxaa laga rabaa cid kasta oo dakhli kasoo galo adeegyadda ama howlo ay u qabtaan hayaddaas ka bixiyaan cashuuraha ku waajibay si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 43: Cashuur Ka Reebidda Alaabta Ganacsiga ah ee La Soo Dajiyo.

1. Soo dajiye kasta waxaa ku waajibaya in uu bixiyo cashuur ka reebida dakhliga ee lagu cadeeyey Shaxda 6.3 Cashuur ka reebidda soo dajiyaasha. iyadoo lagu qiimayey wadarta guud ee cashuurta ka dhalatay furdadda iyo cashuurta iibka, ka hor inta aan alaabta laga sii dayn furdada;
2. Cashuur haynta lagu sheegay farqada sare ee qodobkaan waxa laga jarayaa cashuurta dakhliga sannadka (yearly Income Tax) marka la samayno cadaynta dakhliga sannadlaha ah.

Qodobka 44: Cashuur Ka Reebidda Qandaraasyadda

1. Qiimaha Qandaraasyadda waxaa laga reebayaa qiimaha ku cad Shaxda 6.4 ee cashuur ka reebidda qandaraasyadda;
2. marka qandaraaska loo diwaangalinayo waxaa lacagtayn lagu dari doona cashuurta diwaangalinta qandaraaska si waafaqsan qodobka 79 ee xeerkan;
3. Cashuurta laga reebay waxaa diiwan gashan doonna maamulka dakhliga iyadoo laga jarayo cashuurta dakhliga inta lagu jiro caddaynta cashuurta sannad dakhliyeedka;
4. Dhammaan qandaraasyadda ay bixiyaan hay'addaha caalamiga ah, kuwa maxaliga ah iyo hay'addaha Maamulka waxa cashuurta guud ee ku waajibtay qandaraaska, ka reebayaan shirkadda ama shaqsiyaadka ku guulaysta qandaraaska.

Qodobka 45: Wakhtiga La Cadaynto lana bixinayo Cashuur Ka Reebida

1. Cidkasta oo samaysa cashuur ka reebidda waa in ay soo gudbiso caddaynta cashuureed, kuna bixisaa si waafaqsan nidaamka maamulka dakhliga mudo toban (10) maalmood gudahood ah kadib bisha la reebay cashuurta.





Qodobka 46: Ku Guuldareysiga In La Reebo Cashuurta.

1. Shirkadda iyo shakhsiga laga rabo in uu cashuur reebo oo fulin waaya si waafaqsan xeerkan waxa ku waajibya in uu bixiyo qadarka cashuurta ah ee aan la reebin oo ay wehilyaan ganaaxyadii ka dhashay la daahidda cashuurta, si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 47: Diiwaanka Lagu Hayo Cashuur Ka Reebidda.

1. Cidkasta oo loo sameeyey cashuur ka reebid, waxaa diiwaanka lagu kaydinaayo xogta cashuuraha u diyaarinaya maamulka dakhliga, midaas oo ay ku cadahay lacagaha laga reebay iyo dhammaan cashuur bixinadda uu sameeyey sannad cashuureedkaas;
2. Qofkasta oo cashuur bixiye ah, waa in uu haystaa xogta cashuurihiisa mudda dhan shan (5) sano;
3. Maamulka dakhliga, hadii uu wax uga baahdo cashuur bixiye kasta waa in uu lasoo wadaagaa dhamaan nuquladda ay u baahdaa maamulka dakhliga.

CUTUBKA 6: CASHUURTA DIIWAANGALINTA (Registration Tax)

Qodobka 48: Saldhiga Cashuurta Diiwaangelinta.

1. Cashuurta diiwaangelintu waxay ku waajibaysaa falalka iyo qoraalada ku xusan qodobka 48aad ee xeerkan kuwaas lagu galo gudaha Maamulka.

Qodobka 49: Falalka Iyo Qoraallada Cashuurtu Ku Waajibayso

1. Cashuurta diiwangelintu waxaa ay ku waajibaysaa qoraalada madaniga ah, kuwa maamulka iyo kuwa sharciga waxaana ka mid ah:
 - a. Heshiisyada;
 - b. Qaansheegadka kharashaadka dowladdu bixis baasaboorradda;
 - c. Cadaymaha danbi la'aanta;
 - d. Qandaraasyada;
 - e. Kala wareejinta hantida-guurtada ah iyo ma guurtada ah;
 - f. Lahaanshaha raasumaalka asaaska shirkadaha (initial capital for company establishment);
 - g. Rahanka, cusbooneysiinta qoraalada;
 - h. Tir-tirida rahanka iyo Qoraalada hibada, dhaxalka;
 - i. Sumadda baabuurta;
 - j. Beeraha;
 - k. Dhismayaasha cusub ama dayactirka lagu sameeyey.
2. Qoraalada ku tilmaaman farqada sare ee qodobkan Waxaa diyaarinaya maxkamadaha, Nootaayoooyinka sharciga ah iyo cidii kale oo ay khuseyso.





Qodobka 50: Cadaynta Bixinta Cashuurta Diiwaangelinta.

1. Cashuurta diiwaangelinta waa in la bixiyaa marka la helo ogaalaansha diiwaangelinta qoraaladda ku xusan qodobka 48aad ee xeerkan.
2. Qofka ku guuldaraysta in uu soo cadeeyo cashuurta diiwaangelinta oo aan soo ogaysiin xafiiska maamulka dakhliga ugu dhow, waxaa ku waajibi doona cashuurta lagu leeyahay iyo ganaaxyadda ku xusan xeerkan.

Qodobka 51: Qoraaladda Laga Dhaafay Cashuurta Diiwaangelinta.

1. Heshiisyada qaramada midoobay ay lagasho Maamulka;
2. Qoraalada kale oo ay dowladdu xeer gaar ahaaneed kaga deysay.

Qodobka 52: Qiimaha La Cashuurayo Diwaangalinadda.

1. Qiimaha la cashuurayo waxaa lagu soo duubaya kowda ugu dhow (0) ee USD waxaana la cashuurayaa iyadoo la raacayo qiimaha dhabta ah sida lagu cadeeyey shaxda 7.1 ee cashuurta diwaangelinta.

Qodobka 53: Saldihiga Cashuurta Diwaangelinta Kala Wareejinta Hantida

1. Cashuurtan waxay ku waajibtay cid kasta oo la wareegta hanti maguurta iyo guurta ah;
2. Kala wareejinta waxay noqon kartaa kuwa soo socda midkood:
 - a. Hanti lagula soo wareego lacag;
 - b. Hanti laysku hibeeyo;
 - c. Hanti la kala dhaxlo;
 - d. Dhul marka u horeysa la diwaangelinyo.

Qodobka 54: Qaabka Cashuurta Kala Wareejinadda.

1. Kala wareejinadda, xaq la haanshaha hantida maguurtadda ama guurtada ah ee dhex marta laba dhinac, shuruudaha kale ee xeerku tilmaamayo ka sa kow, waxaa looga baahanyahay warqada cadaynta cashuurta ee ay bixiyaan maamulka dakhliga;
2. Nootaayaha, maxkamada iyo garsooraha u idman u kala qoridda kala wareejinta waxaa ka reeban in ay kala wareejin sameeyaan iyagoo aan helin warqadda cadaynta cashuurta;
3. Hay'addaha Maamulka iyo Degmooyinka waxaa ka reeban in ay u diwaangaliyaan muwaadin dhulkiisa ama hanti kale isagoon helin warqada cadaynta cashuurta;
4. Degmadii aan lahayn nootaayo, maxkamad ama garsooraha qabanaya masuuliyadaas waxaa u fulinaya maamulka degmaddaas.





Qodobka 55: Hantida Laga Dhaafay Kala Wareejinadda.

1. Kala wareejinta hanti maguurtadda ah ee ay sameeyaan hay'addaha garsoorku iyo kala wareejinadda dhex mara hayaddaha Maamulka;
2. Kala wareejinta ay sameeyaan hay'adaha garsoorka waxaa loola jeeda kuwa ku yimaada go'aan maxkamadeed;
3. Waxaa kaloo laga dhaafay dhammaan hay'addaha ku xusan qodobka 51aad ee xeerkan.

Qodobka 56: Taariikhda Cadaynta Cashuurta Dakhliga Hantida Kala Wareejinta.

1. Dakhliga kala wareejinta waxaa la xareeynayaa waqtiga uu dhacay kala wareejinta sida lagu cadeeyey qodobka 53aad ee xeerkan, lamana kala wareejin karo, hanti aan la cashuurin.

Qodobka 57: Qiimaha La Cashuurayo Dakhliga Kala Wareejinadda Hantida.

1. Lacagta lagu iibsaday Hantida ma guurtada ama guurtadda ah, waxaa ku waajibaysaa Qiimaha lagu cadeeyey shaxda 7.2 ee cashuurta diwaangelinta kala wareejinta hantidda;
2. Kala wareejinta gaadiidka waxaa laga cashuurayaa diwaangelinta kala wareejinadda Qiimaha lagu cadeeyey shaxda 7.3 ee cashuurta diwaangelinta kala wareejinta gaadiidka;
3. diwaangelinta hantida ma guurtadda ah ee qofka isaga ugu horeyey (dhulka), hibadda ama dhaxalka waxaa lagu qiimaynayaa goobta ay ku taalo hantidda, sida loo kala saarayo goobaha waxaa habraac ka soo saaraya maamulka dakhliga, waxaana la cashuurayaa Qiimaha lagu cadeeyey shaxda 7.4 ee cashuurta diwaangelinta Hantidda ma guurtadda ah ee hibadda, dhaxalka iyo dhulka qofka ugu horeeyo lahaanshihiisa.



CUTUBKA 7:

CASHUURTA GADISTA (SALES TAX)



Qodobka 58:

Saldhiga Cashuurta Gadista.

1. Cashuurta gadista waxaa ay ku waajibaysaa cidkasta oo isticmaalay a adeegyadda ama badeecadaha ganacsiga ee ku jira qodobka 59aad ee xeerkan.

Qodobka 59:

Adeegyadda Iyo Badeecaddaha ay Ku Waajibayso Cashuurta Gadista.

1. Cashuurta Gadista Badeecadaha:

- a. Keenidda badeecaddaha ka yimaada wadanka dibadiisa kana soo gala xuduudaha;
- b. Badeecadaha loo gado jumlo ama tafaariiq;
- c. Badeecadda ay soo saaraan warshadaha gudaha;
- d. Badeecad kasta oo la dhalan rogo sida dib u farsamayn ama wax ka badalid qaabki asalka ahayd;
- e. Wax soo saarka khayraadka dabiicaga ee wadanka;
- f. Dhammaan badeeco ama adeegyo faa'iido doon ku jiro.

2. Cashuurta Gadista Adeegyadda:

- a. adeegyadda korontadda iyo biyaha ee ay bixiyaan shirkadduhu;
- b. adeegyadda isgaarsiinta kala duwan;
- c. adeegyadda la kireeyo ama la rukunto si bila ah;
- d. adeegyadda nootaayooyinka iyo shirkaddaha kala wareejinadda ka shaqeeya;
- e. adeegyadda madbacadaha iyo daabacadda;
- f. qaansheegyadda hoteeladda ee cuntadda, jiifka iyo adeegyadda kale ee la xidhiidha sida hoolalka loo isticmaalo shirarka & tababaradda;
- g. iibka tigidhada gaadiidka hawada, bada & dhulka;
- h. iibka tigidhada ciyaaraha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah.

Qodobka 60:

Fulinta Waajibaadka Cashuurta Gadista.

1. Cashuurta gadistu waxay ku waajibaysaa marka badeeco soo degto, la iibinayo ama la gadanayo;
2. Cashuurta gadista waxaa lagu darayaa qiimaha qaansheegatadda uu qaadanyo iibsadaha;
3. Cashuurta gadista ee ku waajibta soo dejinta waxaa lacag ahaan loola qaadayaa cashuurta furdadda.





Qodobka 61: Adeegyadda Iyo Badeecadaha Laga Dhaafay Cashuurta Gadista.

Cashuurta gadista waxaa laga dhaafay:


1. badeecooyinka iyo qalabka uu keensado qof ama hay'ad laga dhaafay cashuurta furdada;
2. badeecooyinka iyo qalabka si ku meel gaar ah loo soo dejiyey;
3. Xoghayaha Xafiiska wuxuu soo saari karaa xeer nidaamiye uu kaga dhaafayo s iku meel gaadh ah cashuurta gadista badeecadaha qaarkood daruufo jira awgood.

Qodobka 62: Qaabka Daabacadda Qaansheegadka.

1. Ganacsaduhu waxaa waajib ku ah in uu adeeg walba ama badeeco marka uu iibinayo uu macmiilka siiyo cadaynta qaansheegadka;
2. Qaansheedka waxa looga baahanyahay In qaybta sare ku taalo xogta ganacsiga Lambarka cashuurta bixinaya;
3. Faahfaahinta badeecadda la iibsano Qiimaha wadareed ee badeecadda;
4. Qaabka loo muujinayo cashuurta gadista waa:
 - a. Hadii ganacsaduhu leeyahay nidaamka(system) danabaysan waa in uu ku daraa qaansheegadka uu daabacayo aaladda uu isticmaalayo;
 - b. Hadii uusan lahayn nidaamka danabaysan wuxuu qaansheegadka ugu darayaa qaabqoraal ah;
5. xeerkan waxaa uu ku waajibanyaa dhammaan ganacsatadu in ay isticmaasho nidaam(System) xisaabeed, si loogu daro cashuurta gadista qaansheegadka macmiilka;
6. Nooca nidaam (System) xisaabeedka ay isticmaalyaan ganacsataddu waxaa lagu jaan goynayaa habraaca uu soo saraarto Xafiisku;
7. Shirkadaha daabacadaha waxa ku waajibaya in ay ku muujiyaan cashuurta gadista, buugta qaansheegatooyinka ay daabacayaan, kuna muujiyaan Qiimaha ku cad Shaxda 8.1 ee cashuurta gadista.

Qodobka 63: Sugidda Qiimaha La Cashuurayo.

1. Ganacsatada bixisa adeegyadda ama iibisa badeecadaha lagu xusay Qodobka 59aad ee xeerkan, maka laga reebo soo dajinta, waa in ay qaansheegato u sameeyaan badeecad kasta oo ay iibiyaan ama adeeg ay bixiyaan, hubiyaana qiimaha cashuurta gadista in si sax ah loo xisaabiye looguna daray wadarta guud ee qaansheegtadda;
2. Ganacsatadda lagu sheegay farqadda kowaad ee qodobkaan, waxaa waajib ku ahin ay maamulka dakhliga ugu diwaangashan ayna helaan shahaadda ogolaanshaha cashuurta gadista, ganacsadihii qaada cashuurta gadista ogolaansho la'aan, waxaa talaabo ka qaada maamulka dakhliga, waxaana ku waajibaya ganaaxyadda lagu cadeeyey qodobka 84aad ee xeerkan.





3. Furdooyinku waa in ay ku daraan cashuurta gadista badeecaddaha iyagoo ku salaynaya alaabta qiimaha soo socda midkood:
 - a. Qiimaha furdadu siisay badeecadda ama qiimaha tacriifadda ku cashuurto badeecaddaha iyaga oo isticmaalya, Qiimaha alaabta la midka ihi ay ka joogto suuqa;
 - b. Qiimaha qaansheegadka uu ganacsaduhu kusoo iibsaday badeecadda uu soo dajiyeey.
4. Saddexda qiima ee aynu soo sheegnay, waxaa la qaadanyaa midka ugu sareeya sicir ahaan;
5. Wax soo saarka khayraadka dabiiciga ee iib galka ah waxaa cashuurta gadista ee ku waajibtay ku bixinayaan goobta ugu dhow ee maamulka dakhliga;
6. Qaansheegtooyinku waa inay u lambareeysan yihiin si taxaane ah (sequence), oo ka bilaabanaya lambarkii ay diwaangashadeen maamulka dakhliga, marka ugu danbaysa ee xaraynta cashuurta gadista.

Qodobka 64: Qiimaha La Cashuurayo.

1. Cashuurta gadista waxaa la bixinayaa Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 6.1 ee cashuurta gadista.

Qodobka 65: Cadaynta Cashuurta Gadista.

1. Ganacsaddaha bixinaya cashuurta iibka raacda ee uu uruuriyey waqtiga xadidan, waxaa waajib ku ah in uu cadeeyo isaga oo isticmaalaya Qaabaysanaha(Form) cadaynta ee Maamulka dakhliga kaas oo uu soo raacinayo:
 - a. Dhammaan dokumentiyada la xiriirka iibkiisa waqtigaa;
 - b. Qaabaysanayaasha muujinaya faahfaahinta laga rabo ganacsadaha sida magaca cashuur bixiyuhu ku diwaangashan yahay, cinwaanka, goobta u ku yaalo, tiraddataxanaha (serial number); badeecadda la iibiyey iyo Adeegyadda la bixiyey qaabkasta oo lagu gaday (Credit or Cash).
2. Qiimaha badeecadda ama adeegga la bixiyey ee cashuurta ku waajibtay;
3. Warshadle kasta, waxaa waajib ku ah inuu sameeyo buug ama nidaam (system) diwaan galin lagu qoro:
 - a. Wax soo saarka Warshadda;
 - b. Bakhaar soo gelidda iyo bixidda badeecadda.
4. Diwaanka farqadda 2aad waa in loo diyaariyaa iyaddoo la raacayo habraaca maamulka dakhliga;
5. Ganacsade kasta oo cashuurtaani ku waajibtay, buugtiisa ama nidaamkiisa (system) iibka diwaangalinta qaansheegadka, waxaa qasab ku ah in uu usoo bandhigo maamulka dakhliga markasta oo ay codsadaan.





Qodobka 66: Soo Xareenta Cashuur Gadista.

1. Cashuur bixiyaha waxaa waajib ku ah in uu soo xareeyo cashuurta gadista, bisha cashuurta uu uruuriyey bisha xigta tobankeeda (10) keeda kama dambays.

CUTUBKA 8: CASHUURTA WADA MARISTA (ROAD TAX)

Qodobka 67: Saldhiga Cashuurta Wada Marista

1. Sashuurta wada maristu waxay waajib ku tahay gaadiid kasta oo jooga gudaha Maamulka SSC-Khaatumo.

Qodobka 68: Diwaangalinta Gaadiidka ay Ku Waajibtay Cashuurta Wada Maristu.

1. Maamulka cashuurahu waxay diwaangalinyaan gaadiid kasta marka la helo buleetada furdaddu kusoo cashuurtay iyo buugga lahaanshaha;
2. Gaadiid kasta oo soo gala sooh dinta maamulka waa in laga diwaangaliyaa maamulka dakhliga si waafaqsan farqadda 1aad ee qodobkaan.

Qodobka 69: Gaadiidka Leh Cashuur Dhaafka Joogtadada Ah

1. Gaadiidka laga dhaafayo cashuurta wada marista:
 - a. Gaadiidka Maamulka;
 - b. Gaadiidka Safaaradaha/ama wakiillo dublimaasiyadeed, marka la hubiyo inay leeyihiin;
 - c. Gaadiidka ay mulkiyadeeda leeyihiin qaramada midoobey iyo hayaddaha caalamigaah;
 - d. Gaadiidka isbitaallada iyo gurmada/Badbaadada caafimadka sida, ambalaasyada, gaadiidka maydka qaada, dabdamiska;
 - e. Iyo gaadiidka xeerku si kale u siiyey cashuur dhaafida.
2. Gaadiidka leh cashuur dhaafka joogta ah ee lagu sheegay farqadda koowad ee qodabkan, hadii mulkiyadu u wareegto cid ka baxsan kuwa leh cashuur dhaafka, waxaa ku waajibaya cashuurta furdadda ee marka hore laga dhaafay iyo cashuurta wada marista oo markaa uga bilaabanaysa.
3. Gaadiidka leh cashuur dhaafka joogta ah waa in ay sannad walba bilowgiisa yimaadaan xafiiska maamulka dakhliga, kana qaataan warqada ogolaanshaha sannadlaha ah si loogu fududeeyo.





Qodobka 70: Ogolaansho Fasax Ku Meel gaadh Ah

1. Gaadiidka soo gala soohdimaha Maamulka kana diwaangashan maamulka baxsan SSC-Khaatumo; joogayana wakhti cayiman oo uu leeyahay qof ama hay'ad, waxaa la siinayaa fasax wada maris oo ku meel gaar ah oo aan ka badnayn mudo saddex bilooda, waxaana siinaya fasaxa maamulka dakhliga;
2. Gaadiidkaas waxa ku waajibaysa in ay bixiyaan cashuurta diwaangalinta si waafaqsan qodobka xeerkan iyo cashuurta wada marista ugu yaraan saddex bilood ah;
3. Waqtiga uu joogo gudaha maamulka, waa in uu haystaa waraaqda ogolaanshaha wada marista;
4. Marka mudadaas ay dhammaato waa in uu gaadiidku bixiyaa dhammaan cashuuraha ku waajibay ama waa in uu ka baxaa maamulka.

Qodobka 71: Wadashada Warqadda Caddeynta Bixinta Cashuurta.

1. Gaadiidka waxaa khasab ku ah inay mar walba wataan warqada cadeynta Cashuur bixinta oo ay ku cadahay qadarka lacageed ee laga qaaday muwaadinka cashuur bixiyaha iyo mudada loo cashuuray;
2. Tasmadda(Sticker) caddeynta, waa inay ku dhegsan tahay meel muuqata oo gaadhiga banaankiisa ah;
3. Waxaa mamnuuc ah inay socdaan baabuur aan sidan warqada iyo tasmadda caddeynta cashuur bixinta, marka laga reebo gaadiidka ku xusan qodobka 68aad ee xeerkan;
4. Hadii ay ka lunto ama xumaato warqadda caddeynta bixinta cashuurta, mulkiiluhu wuxuu codsi sababaysan u gudbinayaa xafiiska maamulka dakhliga si nuqul kale loogu sameeyo, waxaana uu bixinayaa cashuurta moorka si waafaqsan Qodobada xeerkan.

Qodobka 72: Qaabka Qaadista Cashuurta Gaadiidka.

1. Cashuurta waxaa loo qaadayaa sadex biloodle, lix biloodle ama sannadle, waxaana qaadaya xafiisyada u qaabilsan, Waxayna bixinta cashuurta bilaamaysaa bilawga bisha janaayo ama bilawga 3 ama 6 billood walba bisha u horeysa;
2. Shan iyo tobbon 15 casho ka dib bilowga bixinta cashuurta waxaa raacayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 84aad ee xeerkan.





Qodobka 73: Qiimaha La Cashuurayo Cashuurta Wada Marista.

1. Cashuurta wada marista waxaa lagu cashuurayaa qiimayaasha lagu cadeeyey Shaxda 9.1 ee cashuurta wada marista;
2. Cashuurta wada marista waxaa lagu qiimaynaynaa quwadda gaadiidka (HP) ama culayskooda (tons);
3. Gaadiidka qaybtood oo cashuurtooda laga dhigo mid xili ama xaalad ku xadidan, waxay maamulka dakhliga kasoo saarayaan habraac u gaara ah;
4. Gaadiidka waxaa si sannadle ah ugu waajibaysa cashuurta hubinta badqabka gaadiidka (Kalaweeto), Habraacyadda lagu maamulayo badqabka gaadiidka waxaa soo saaraya hayaddaha ay qusayso. qiimaha lagu cashuurayo waxaa lagu cadeeyey Shaxda 9.2 ee cashuurta hubinta badqabka gaadiidka.

Qodobka 74: Ku Guul Daraysiga Bixinta Cashuurta Wada Marista.

1. Baabuurta ku guuldaraysta in ay cashuurta ku bixiyaan waqtiyadda loo cayimay waxaa laga qaadi doona talaabooyinka soo socda;
 - a. In ciidamadda ilaaladda cashuuraha iyo ciidamadda ilaaladda wadooyinka ay baabuurka ka joojiyaan isticmaalka wadooyinka ayna xareeyaan ilaa inta uu ka bixinayo cashuurta, waxaana laga qaadayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 86aad ee xeerkan.
2. Baabuurta lagu xareeyey goobaha ciidanka ilaaladda cashuuraha habeen kasta oo ay ku dhaxaan waxaa laga qaadayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 84aad ee xeerkan.

Qodobka 75: Baabuurta Fadhida Ee Aan Shaqaynan.

1. Waa in uu gaari walba oo laga safrayo ama howl kale u fariista sida cilad ku timaada gaariga la keeno ogaysiintiisa xafiiska maamulka dakhliga. Taas oo lagu cadayno kilometers (KM) gaariga mesha uu marayo iyo sababta uu u fariistay, waxaan laga soo saarayaa habraac u gaara oo arinkan.





CUTUBKA 9: CASHUURTA MOORKA (Stamp Tax)

Qodobka 76: Saldhiga Cashuurta Moorka

1. Cashuurta moorku waxay noqon kartaa mid cayiman (fixed) ama saamigal ah (proportional);
2. Cashuurta moorka cayiman waxay yeelanaysaa qiime go'an lagana qaadayo qoraal kasta oo ay ku waajibtay kuna qeexan xeerkan;
3. Cashuurta moorka ee saamiga galka ah (proportional tax) waxaa laga qaadayaa dadka waajibaadka lacag bixineed lagu leeyahay, badeecadaha la gadanayo, la iibsanayo, damaanad qaadka hantiyeed iyo rahanka, haddii bankiyada lagu kaydsado ama meel gaar ah la dhiganayo;
4. Dhacdo kasta oo qiime lacageed leh oo dowladdu qayb ka tahay waxaa laga qaadayaa cashuurta Moorka ee Boqolayda ah.

Qodobka 77: Cashuurta Moorka (Stamp Tax)

Cashurta Moorka waxaa loo bixinayaa habka soo socda:

1. Iyadoo la isticmaalayo warqadaha tigidyada moorku ku daabacan yahay;
2. Iyadoo la gadanayo tigidyada moorka laguna dhajinayo qoraalada la isticmaalayo;
3. Iyadoo lacag ahaan loogu bixinayo cashuurta moorka xafiisyada cashuuraha amaxafiis kasta oo Maamulka dakhliga u idmado.

Qodobka 78: Qiimayaasha Cashuurta Moorka Cayiman

Go'aanada Madaniga ah (Civil Acts):

1. Cashuurta moorka cayiman waxaa laga qaadayaa qoraalada hoos ku qeexan sida ku cad Shaxda 10.1 ee cashuurta moorka go'aanadda madaniga ah:
2. Asalka iyo nuqulada go'aanada maxkamadaha, qoraalada nootaayadu ka marag noqotay ama cadaaysay ayna diiwan gelisay, ama xafiisyo kale oo awood loo siiyey, Lana cadeeyey asalnimada qoraaladaas, nashqado iyo wixii tafaasiil ah ee ku lifaaqan:
3. Asalka iyo nuqulada qoraalada u gaar ah shakhsi (Unilateral), lamaane (bilateral) iyo kuwo kooxeed ba (multi literal) oo la xiriira curin, wax ka bedelid, wax ku darid, dhamaystirid, ama qiraal oo af ama dhaar ah nooc kasta oo uu yahay;
4. Asalka iyo nuqulada qoraalo la turjumay ama warbixino la soo koobay, Diiwaangelin iyo Buugaag dib loo daabacay uu xaqiijiyey xafiis dowladeed inay nuqulo sax ah yihiin, iyo waraaqaha ka marag kacaya ee Maamulka:





5. Asalka iyo Nuqulada ballan qaadyo lagu heshiiyey oo qume hantiyeed leh ama aan lahayn, cadaymaha awood siinta Qareenada ama wakiilashada dad gaara, warqadaha iibka ama gadashada, cadaymaha qaadashada ama bixinta deynta ama heshiiska maalgashiga iyo cadayn kasta oo saamaysa hanti, qoon, dil, iyo mag;
6. Asalka iyo nuqulada arjiyada dacawad furasho nooc kasta oo ay yihiin, qoraalada iyo nuqulada bankiyada sida deyn ama horumarin lacageed, ku waas oo ka duwan asalka iyo nuqulada cashuurtoodu ku xusan tahay qodobada kale ee xeerkan.
7. Go'aano Maamul (Administrative Acts);
8. Dib u furista ,baarista ,arjiyada ,qoraalada dacwado maamul la xiriira iyadoo aan markii hore la soo marin Maxkamad lana horgeeyey qaybaha maamulada Maamulka dhexe ama hoose waxaa ku waajibaya cashuurta moorka sida ku cad Shaxda 10.2 ee cashuuraha moorka ee go'aanadda maamulka;
9. Go'aanada Garsoorka (Judicial Acts);
10. Cashuurta Moorka cayiman waxaa laga qaadayaa qoraalada hoos ku qeexan sida ku cad Shaxda 10.3 cashuuraha moorka ee go'aanadda Garsoorka;
11. Go'aanada maxkamadaha madaniga, qoraalada dhexdhexaadinta iyo baarista qoraalada lagu kaydiyey maxkamadaha;
12. Asalka iyo qoraalaada ay soo saaran ama la horgaynayo maxkamadaha, ha noqdeen dacwad maamul ama mid madani ah, sida nuqulada iyo qoraalada loo diro dhinacyada is haya ama la haysto;
13. Go'aanada kala qaybinta ganaax wadareed, laguna mutaystay maamul xumo iyo sixitaanka maamul xumada kuna timid xadgudub sharci ama khilaaf heshiis;
14. Go'aanada iyo Qoraalada ajnabiga ah;
15. Qoraalada iyo go'aanada ganacsi ama ujeedo sharci leh kana soo unkumay dalka dibadiisa kuna xusan qodobada xeerkan sida ku cad Shaxda 10.4 cashuurta moorka go'aanadda iyo qoraaladda ajaanibiga;
16. Warqadiiba mudo dhan 7 maalmood gudahood marka ay soo galaan dalka;
17. Manifestooyinka Maraakiibta, doonyaha iyo dayuuradaha (Ships, boats and Air Manifest);
18. Cashuurta Moorka cayiman waxaa laga qaadayaa Cadeymaha hoos ku qeexan sida ku cad Shaxda 10.5 Cashuurta moorka ee Manifestooyinka doonyaha iyo dayuuradaha.

Qododka 79: Cashuurta Moorka Ee Boqolleyda Ah (Proportional Tax)

1. Qaansheegatooyinka iyo dakhli kasta oo Maamulka loo qabanayo & kharash kastaa la bixinayo;
2. Dakhliga Maamulka (Cashuuro Berri ama furdo) iyo Cashuurta dakhliga Shaqaalaha;
3. Cashuurta Moorka Boqolayda waxaa loo qaadayaa sida ku cad Shaxda 10.6 ee cashuurta moorka boqolayda ah.





Qodobka 80: Qoraalada Laga Dhaafayo Cashuurta Moorka

1. waxaa laga dhaafay cashuurta moorka qoraalada & heshiisyada soo socda:
 - a. Deeqaha ay bixiyaan hay'adaha samafalka ah;
 - b. Qoraalada hay'adaha qaramada midoobey;
 - c. Qoraalada safaaradaha iyo diplomaasiyiinta;
 - d. Qoraalada ka soo baxa xafiisyada Maamulka;

Qodobka 81: Been Abuurka Iyo Laba Jeer Adeegsiga Moorka

1. Ciddii ay ku cadaato in ay dhalan rogtay ama labo jeer adeegsatay tikigiyadda iyo waraaqaha cashuurta moorka leh, waxaa ku waajibaya ciqaabaha uga yaala been abuurka xeerarka Mmulka SSC-Khaatumo iyo ganaaxyadda ku xusan qodobka 84aad ee xeerkan.

Qodobka 82: Gaddida Iyo Isticmaalka Tigidyada Iyo Warqadaha Moorka

1. Cid kasta oo gadda, jumlo ama tafaariq ahaan, tigidyada iyo warqadaha cashuurta Moorka oo been abuur ah waxay gelayaan fal danbiyeed waxaana lagu ciqaabayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 84aad ee xeerkan;
2. Waxa keliya oo dalka dibadiisa iyo gudihiisa ku daabici kara kuna gadi Kara warqadaha iyo tigidyada cashuurta moorka Xafiiska maaliyadda Maamulka SSC-Khaatumo ee Soomaliyeed, iyo ciddii ay ogolaansho sharci ah u siiso;
3. Codsii, arji ama qoraal kasta oo uu ku dhejisanyahay tigidka cashuurta moorku waxaa xil ka saaranyahay mas'uul kasta inuu xaqiijiyo in isku tilaab lagu dhufatay taasoo cadaynaysa in la isticmaalay.

Qodobka 84: Xil Gudashada Cashuurta Moorka

1. Dhammaan qoraalada ay ku waajibtay cashuurta moorka ee soo gelaya xafiisyada Maamulka waa in ay hubiyaan in laga qaaday cashuurta moorka ee ku waajibtay, haddii kale dib loo celiyo;
2. Qoraal kasta oo ay ku waajibtey cashuurta moorka ee ku xusan xeerkan, waa in lagu dhejiyaa cashuurta moorka;
3. Heshiisyada iyo Qoraalada kale ee aan ka soo bixin dalka gudihiisa waxaa laga qaadayaa cashuurta Moorka xilliga ay soo gaaran xafisyada cashuurta moorka qaabilsan.





Qodobka 85: Qiima Dhaca Tigidyada Moorka

1. Sababaha ay ku qiime dhacayaan tigidyada cashuurta moorka waa sidan hoos ku xusan:
 - a. Hadii la soo been abuuray;
 - b. Hadii hore loo isticmaaley;
 - c. Hadii la tirtiro ama la dhalan rogo.

CUTUBKA 10: QODOBADA QUBANAHA AH

Qodobka 86: Ganaaxyadda

1. Ganaaxyadda soo socda ayaa xeerkani ku waajibinaya dhammaan cidii aan u hogaasamin sharuucda cashuuraha iyo habraacyadda dakhliga:
 - a. ka been sheegid cadaymaha cashuurta iyo dhammaan qoraaladda loo soo gudbiyomaamulka dakhliga;
 - b. La daahida cusboonaysiinta shatiyadda Maamulka;
 - c. La daahidda bixinta cashuurta xilligeeda la gaaray;
 - d. Is hor taagid go'aan cashuureed;
 - e. Been abuurka qoraaladda iyo shahaadooyinka cashuuraha;
 - f. La dhuumashadda cashuur waajibtay;
 - g. Ku guul daraysiga soo cadaynta cashuurta xilligeeda la joogo;
 - h. Dhinaanshaha Bixinta cashuurta waajibtay;
 - i. Fulin howlaha maamulka dakhliga wakiilasho la'aan;
 - j. Iyo dhammaan ganaaxyadda kale ee maamulka dakhliga u arkaan inay muhiim yihiin, waxaana wareegto kusoo saarayaa Xoghayaha Xafiiska;
 - k. Qiimayaasha ganaaxyadda lagu sheegay farqadda koowaad ee qodobkaan waxaalagu cadeeyey shaxda 11.1 ee Ganaaxyadda Cashuuraha.
2. Maamulka Ganaaxyadda iyaga oo faahfaahsan waxaa lagu qeexay xeerka Maamulka dakhliga.

Qodobka 86: Ajuurooyinka Iyo Shatiyadda.

1. Ajuurooyinka iyo Shatiyadda waxaa xeerarkooda iyo siyaasadahooda maamul soo saaraya Xafiiskaha iyo Hay'adda ay khuseeyaan;
2. Xeerkan waxaa lagu qeexayaa oo kaliya qiimayaasha la qaadayo ee la xiriira adeegyadooda;
3. Ajuurooyinka xeerkan uusan qeexayn waxay noqonyaan kuwa aan jirin una baahan in lagu soo daro shaxaha cashuuraha ee sannad miisaaniyadeedka;
4. Ajuurooyinka iyo shatiyadda qiimayaashooda waxaa lagu cadeeyey shaxaha ka bilaabanaya 11.2, Shax walba waxaa ku astaysan magaca ama nooca ajuuradda/Shati iyo Xafiiska ama hay'adda maamulka.



Qodobka 87: Shaxaha Cashuuraha.

1. Shaxaha cashuuraha waa shaxaha lagu taxay lifaaqa labaad ee xeerkan;
2. Waxaa wax ka bedel lagu samayn karaa shaxaha cashuuraha iyadda oo waxba loo dhimayn xeerkan;
3. Sannadkasta waa in la raaciyaa shaxaha cashuuraha miisaniyadda xata hadii aanay jirin wax iska bedeley;
4. Maamulka dakhliga waxay isticmaalayaan shaxaha lagu ansixiyey miisaaniyadda Maamulka ee sannad walba, halka shaxihii ka horeeyey la tirtirayo;
5. Shaxaha sannad walba waxay dhaqan gal noqonyaan marka golaha Golaha Fulinta ansixiyaan, laguna soo saaro faafinta rasmiga;
6. Shaxaha waxay isticmaal gal noqonyaan bilowga sannadka cusub.

Qodobka 88: Xeer Nidaamiye

1. Xafiiska waxaa uu kusoo saarayaa xeer nidaamayaasha habraacyadda iyo qodobadda u baahan faahfaahin dheeraad ah ee khuseeya xeerkan.

Qodobka 89: Burin

1. Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.

Qodobka 90: Dhaqangal

1. Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha dhexe ansixiyo, Hoggaamiyuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Maamulka.





Lifaaqa 1: Cashuur Ka Reebid (la xariira Qodobka 65aad)

SN	Noocyadda Cashuur Ka Reebidda	Cida ka reebaysa Cashuurta
1	Cashuurta Dakhliga shaqadda	Loo shaqeeyaha
2	Cashuurta Dakhliga kiradda	Kireeyaha
3	Cashuurta Dakhliga qandaraasyadda	Qandaraas bixiyaha
4	Cashuurta Macaashka saamiyadda	Maamulka shirkadda
5	Cashuurta Dakhliga ma degganaha	Wakiilkiisa
6	Cashuurta Dakhliga iibka saamiyadda	Shirkadda uu ka dhacay iibka saamiga
7	Cashuurta Macaashka lahaanshaha	Maamulka shirkadda
8	Cashuurta Dakhliga faaidada ganacsiga	Furdooyinka
9	Cashuurta Dheefta Hantidda	Nootaayadda
10	Qof cashuur hore looga reebay ku bixinaya	Goobaha reebi kara cashuuraha
11	Kala wareejinta Hantidda iyo dheefta Hantidda	Nootaayadda
12	Cashuurta Diwaangalinta	Hayaddaha Maamulka





Lifaaqa Labaad: Shaxaha Cashuuraha

Shaxda	Magaca Shaxda
3.1	Cashuurta Faa'iidada macaashka ganacsiga iyo xirfadleyaasha
3.2	Cashuurta qiyaasta dakhliga
3.3	Cashuurta macaashka gaadiidka xamuulka.
3.4	Cashuurta macaashka wax soo saarka beeraha
3.5	Cashuurta macaashka saamiga
3.6	Cashuurta dakhliga mar qaadka ah
3.7	Cashuurta dakhliga kiroyinka
3.8	Cashuurta dakhliga Shaqadda.
3.9	Gunooyinka aan lacagta ahayn
3.10	Dakhliga taakulooyinka
3.11	Cashuurta dakhliga xoogsatadda
3.12	Cashuurta gunnadda gudiyadda sare
3.13	Qiima dhaca hantidda
4.1	Cashuurta dakhliga shirkaddaha
5.1	Cashuurta dheefta Hantidda
6.1	Cashuur ka reebidda ma deggenayaasha
6.2	Cashuur ka reebidda macaashka lahaanshaha ma deggane
6.3	Cashuur ka reebidda soo dajiyaal
6.4	Cashuur ka reebidda qandaraasyadda
7.1	Cashuurta Diiwaangalinta
7.2	Cashuurta diiwaangalinta kala wareejinta hantidda
7.3	Cashuurta diiwaangalinta kala wareejinta Gaadiidka
7.4	Cashuurta diiwaangalinta kala wareejinta hantidda ma guurta ah ee hibadda, dhaxalka ama dhulka qofka ugu horeyey lahaanshihiisa.
8.1	Cashuurta Gadista.
9.1	Cashuurta wada marista.
9.2	Cashuurta badqabka gaadiidka (Kalaweeto)
10.1	Cashuurta moorka ee go'aanadda madaniga ah
10.2	Cashuurta moorka ee go'aanadda Maamulka.
10.3	Cashuurta moorka ee go'aanadda Garsoorka.
10.4	Cashuurta moorka ee go'aanadda iyo qoraaladda ajaabiniga ah.
10.5	Cashuurta moorka ee manifestooyinka doonyaha iyo dayuuradaha





10.6	Cashuurta moorka ee boqolleyda ah
11.1	Ganaaxyadda cashuuraha.
11.2	Ajuurooyinka iyo shatiyadda.

